# Macluumaadka Caafimaadka Sirta ah
# Heshiishka Ogolaanshaha ama Ka-noqoshada
**Confidential Health Information Consent Agreement or Withdrawal**

| MAGACA QORAN EE MACMIILKA | TAARIIKHDA DHALASHADA MACMIILKA |
|---|---|
| | |

Waxaa laguu direy barnaamijka Wanaagga Korsashada (FWB) si barnaamijkeenna uu ugu caawiyo adiga iyo dadka kale ee ku lugta leh daryeelkaaga in ay fahmaan baahiyadaada caafimaad. Inta aad ku jirto meelaynta guriga ka baxsan, waa muhiim in bixiyeyaasha adeegga daryeelkaaga caafimaad iyo dadka kale ee ku lugta leh daryeelkaaga in ay wada hadlaan isuduwidda daryeelkaaga caaafimaad. Mararka qaar, diiwaanadaada caafimaadka waxay ku jiri karaan nidaam kombiyuutar ama qoraal waxaanna ka mid noqon kaa macluumaad ku saabsan:

- Adeegyada qorsheynta qoyska ah sida xakameynta dhalmada iyo ilmo iska soo xaaqidda;
- Caabuqyada Galmada Laga Kala-qaado (STI), caabuqyada aad galmada ka qaadi kartid, oo horey loo oran jirey “Cudurrada Galmada Lagu Kala-qaado (STD),” iyo/ama HIV/AIDS; iyo/ama
- Daawooyinka iyo adeegyada Caafimaadka Dhimirka;
- Adeegyada Kiimiko Ku-tiirsanaanta

Maadaama noocyadan macluumaada caafimaadka ay yihiin kuwo gaar ah, lammaanayaasha gacanta ku haya macluumaadkaaga caafimaadka ma siin karaan macluumadkan caafimaadka dad kale haddii aad adigu oggolaato mooyaane, ama Sharciga Gobolka Washington uu sheego in ay siin karaan macluumaadka dad kale.

Haddii aadan sixiixin foomkan, waxaad weli awoodi doontaa in aad adeegyada ka hesho barnaamijka FWB. **Dhammaan dhallinyarada ay da'adoodu tahay 13 ee loo soo direy barnaamijkeenna waxaa la weyddiin doonnaa haddii ay rabbaan in ay saxiixaan foomkan, haddii uu ku khuseeyo ama uusan ku khuseynin nooca macluumaada caafimaadka ee foomkan ku jira.**

Marka aan sixiixo ogolaanshahan, waxaan ogolaanayaa in dadka aan ku sheegay foomkan in ay ogolaansho u haystaan in ay eegaan macluumaadkeyga caafimaad ee gaarka ah. Waxayna ka tashan karaan dhexdooda si ay iigu caawiyaan maamulida daryeelka caafimaadkayga. Macluumaadkeyga caafimaadka ee sirta ah waxaa ka mid diiwaanno ku saabsan jirrooyin ama dhaawacyo aan hadda leeyahay ama aan horey u lahaa. Diiwaannada waxaa ka mid noqon kara natiijooyinka baaritaanka (sida raajitooyinka iyo baaritaannada dhiigga), daawooyinka aan hadda qaato ama aan horey u qaatey, iyo diiwaannada laga helay booqashooyinka cusbitaallada, xafiisyada adeeg-bixiyaha ama xarumaha iyo/ama rugaha kale ee caafimaadka.

Waxaan fahamsanahay in aad la noqon karo ogolaanshaheyga waqti kasta anniga oo saxiixaya foomkan ka-dibna siinaya Shaqaalaheyga Bulshada ama barnaamijka FWB. Tani ma saameyn doonto macluumaad kasta ee horey loo wadaagey.

**Qaybta 1:**

WAXAAN OGGOLAHAY in aan u oggolaado barnaamijka FWB in uu helo oo la wanaago macluumaadkeyga caafimaadka ee hoos lagu calaamadeeyay bixiyeyaasha daryeelkeyga caafimaadka dhimirka iyo caafimaadka kale oo ay ku jiraan Shaqaalaha Bulshada ee Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska (DCYF) iyo/ama Shaqaalaha Bulshada Qabiilka, Daryeelaheyga Hadda, iyo Waalidka(Waalidiinta) I Dhaley:

☐ Dhammaan diiwaanada macmiilkayga, oo ay ku jiraan, laakiinse aysan ku xaddidneyn, Caafimaadka, Caafimaadka Taranka (tusaale ahaan, xakamaynta dhalmada, uurka, iyo ilmo iska soo xaaqidda), Cudurka Aydhiska HIV/AIDS iyo natiijooyinka baaritaanka STD/STI, diiwaannada ogaanshaha ama daaweynta cudurka (RCW 70.02.220), diiwaannada Caafimaadka Maskaxda (RCW 70.02.230), iyo diiwaannada Kiimiko Ku-tiirsanaanta (CD) (42 CFR Qaybta 2).

**AMA** (haddii Qaybta 1aad aanan la buuxin, fadlan buuxi labada qaybood ee Qaybta 2aad ee hoose)

Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

# Macluumaadka Caafimaadka Sirta ah
# Heshiishka Ogolaanshaha ama Ka-noqoshada

**Confidential Health Information Consent Agreement or Withdrawal**

**Qaybta 2aad: (Qaybaha 2A iyo 2B waa in la buuxiyaa)**

**2A.** WAXAAN OGGOLAHAY in aan u oggolaado barnaamijka FWB in uu helo oo la wanaago macluumaadkeyga caafimaadka ee hoos lagu calaamadeeyay keliya Bixiyeyaasha / Lammaanayaasha hoos lagu calaamadeeyay:

- ☐ Natiijooyinka baarista HIV/AIDS iyo STD/STI, oggaanshaha, ama daaweynta cudurka (RCW 70.02.220)
- ☐ Caafimaadka Taranka (adeegyada qorsheynta qoyska sida xakamayta dhalmada iyo ilmo iska soo xaaqidda)
- ☐ Diiwaadanada Caafimaadka Dhimirka (RCW 70.02.230)
- ☐ Diiwaanada Kiimiko Ku-tiirsanaanta (CD) (42 CFR Qaybta 2)

**2B.** Adeeg-bixiyeyaasha / La-hawlgalayaasha barnaamijka FWB uu diiwaannadaada la wadaagi karo (calaamadee dhammaan kuwa ku habboon):

- ☐ Adeeg-bixiyeyaasha Caafimaadka
- ☐ Shaqaalaha Bulshada ee Qabiilka iyo/ama DCYF ee Hadda
- ☐ Adeeg-bixiyeyaasha Caafimaadka Taranka
- ☐ Daryeelaha / Waalidka Korsashada / Daryeelaha Sokeeyaha ah ee Hadda
- ☐ Bixiyeyaasha Caafimaadka Dhimirka
- ☐ Waalidka(Waalidiinta) Dhaley (qor magacyada koowaad iyo dambe):
- ☐ Kuwo kale (qor):

Waxaan sidoo kale OGGOLAHAY in la-hawlgalayaasha lagu qorey foomkan ay iyaga dhexdooda ay waddaagi karaan macluumaadeyga caafimaadka, iyo in aysan la waddaagi karin qof aan ku qorneyn foomkan. Waxaan wax ka beddeli karaa fikirkeyga oo aan dib ula noqon karaa ogolaanshaheyga waqti kasta anniga oo **calaamadeynaya sanduuqa hoose (isticmaalaya DSHS 10-489 oo cusub), saxiixaya,** oo siinaya Shaqaalaheyga Bulshada ama barnaamijka FWB. Tani ma saameyn doonto macluumaad kasta ee horey loo wadaagey. Xarfaha hore ee magaca: ___________

Haddii aan horey ula noqdey mooyaane, macluumaadka cayiman ee kor ku xusan wuxuu ansax yahay ilaa aan kaga baxayo daryeelka korsashada, ama ilaa iyo ______________________.
TAARIIKHDA DHICITAANKA

☐ Waxaan la noqdey oggolaanshaheyga. Fadlan buuxi qaybtan saxiixa ee soo socota.

| SIXIIXA MACMIILKA AMA WAKIILKA MACMIILKA EE SHARCIGA AH | TAARIIKHDA |
|---|---|
| QOR MAGACA WAKIILKA SHARCIGA AH | XIRIIRKA UU LA LEEYAHAY WAKIILKA SHARCIGA AH MACMIILKA |

**Ogeysiis ku socda Qaatayaasha:** Macluumaadkan waxaa lagaaga sheegay diiwaanno ay ilaaliyaan sharciyada dowlada ee sirta ah, Xeer-nidaamiyeyaasha Federaalka (CFR) ee 42, Qaybta 2. Sharciyada dowlada federaalka ayaa kaa mamnuucayaan in aad ku sameysid shaacin kasta oo dheeri ah macluumaadkan haddii shaacin dheeri ah si cad loogu oggolaaday oggolaanshaha qoraalka ah ee qofka ay arrintu khuseyso ama si kale uu u oggolaaday dhinaca 42 CFR, Qaybta 2. Oggolaansho guud oo loogu talogalay sii deynta macluumaadka caafimaadka ama macluumaad kale ma **AHAN** mid ku filan ujeeddadan.